Fu’aad
Bahda Mareegta Farshaxan

# JABINTII JEELKA MADHEERRA.

Qaybtii Koowaad…(05- JUNE- 1988.)

Waxay ahayd barqadii lixiyo labaatankii may ( 26- 5- 88 ) oo ahayd maalin khamiis ah, markii aanu maqallay siidhiga askarta jeelka oo makhsin walba ka dhex qaylinaaya iyo waliba askarta oo maxaabiista ugu baaqaya in laysugu yimaado bannaanka weyn ee jeelka dhexdiisa ah.

Haddii mid guri ku jiray, mid musqusha ku jiray iyo mid xamaamka maydhashada ku jirayba ay isugu yimaadeen barxaddaa weyn askartuna ay aad u dhoobantahay dhinacyada maxaabiista, ayaa waxa ka soo galay albaabka u dhaxeeya qaybta maxaabiista iyo xafiisyada askarta, sarkaal labisan dirayskiisii ciidannimo oo ay ku lamaantahay darajadiisiina. Muu ahayn nin aanu hore u aragnay, waxaase jirtay in maalintaa laba, saddex casho ka hore uu geeryooday taliyihii xabsiga dhexe ee Madheera Daahir jubonayn oo xanuun kadis ahi ku soo booday, waxaana kollayba la sugayey in taliye cusub loo soo magacaabi doono jeelka weyn ee Madheera.

Waxa uu noo sheegay inuu yahay taliyihii xabsiga dhexe ee Hargaysa ( waa ninkii Xasan Jilic ) badalaye iyo geerida ku timid taliyixii xabsiga Madheera iyo waliba in isaga lagu soo amray inuu sii tago Madheera inta cid loo soo magacaabayo. Qudbad isagu jirta wax sheeg iyo amar farid kadibna wuxuu noo sheegay inaanu hawlahayaga qabsanno.

Haddii intaani dhacday, waxaa la baadi doonay bal in la helo cid soo martay jeelka Hargaysa oo warbixin maxaabiista ka siisa dabeecadda iyo dhaqanka ninkaasi leeyahay, durbadiibana waxaa la helay lana sheegay inuu yahay in aan xilkas ahayn kuna soo meeraysta xataa raashinka iyo lacagta yar ee dadka maxaabiista ah qaraabadoodu ay u keenaan, waxaana habeenkaa la kala seexday iyadoo laga dharagsanyahay ninkaasi iyo dabcigiisa.

Subaxnimadii hore ee maalintaa ku xigtay oo ahayd maalin Jimce ah bisha Mayna ay ahayd todoba iyo labaatan ( 27- 5- 1988 ) saacaduna ay ahayd abaaro todobadii subaxnimo, ayaa waxaa jeelka soo galay koox saraakiil milatariga ah oo uu horkacayey taliyihii dugsiga milatariga ee madheera Cabaas kuwaasoo fuulay qolka rakaalka, inyar ka dibna waxaad arkaysay askartii jeelka oo la soo wada baxay kuna gaadhan hubkoodii iyo qalabkoodii dagaalka.

Maalinta Jimcuhu waxay ahayd maalinta dadka maxaabiista ah ay soo booqdaan qaraabadoodu, waxaana salaadii horeba loo sii diyaargaroobay soo dhaweyntii dadka, iyadoo maalintaasi tahay maalin ay maxaabiistu helaan wararka todobaadkaa la soo dhaafay. Waxaa loo yeedhay maxaabiistii u horraysay ee loo yimid ( sida caadadu tahay maalintaa maxaabiista badankoodu waxay tubnaan jireen albaabka maxaabiista looga yeedho iyo agagaarkiisa ) markii ay soo noqdeena waxaa la weydiiyey sidii caadadda ahayd cidda u timi iyo war wixii ku soo kordhay. Waxay maxaabiistii sheegeen inaan habayaraatee cidna la tusin ee lagu yidhi oo kali ah raashinkan ayaa laydiin keenee qaata. Waa wixii lagu sheegayey iyo tolow ma wuxuu ina moodayaa "Abu jeerin " miyaanu ogayn in ragga meesha ku jiraa yihii xabsi daa' in


Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

ayaa markiiba laysla dhex qaaday, iyadoo aad arkaysay raggii siyaasadda u xidhnaa oo afar - afar iyo sadex - sadex geedaha hoostooda isagu imanaya kuna faqaya. Yaanu jirin nin qudha oo
raashinka soo qaataa, haddaan layna tusayn dadkeena aynuu ahaa waxa kali ah ee maxaabiistaa siyaasadda u xidhani ay is faraysay, waxaana markiiba saraakiishii jeelka la gaaadhsiiyey in uu jiro kacdoon ka dhan ah raashinka khaliga ah ee aanay cidina sidin ee maxaabiista loogu yeedhayaa.
Waxaa noo yimid nin kabtan ah oo ah taliye kuxigeenkii jeelka anagoo ah afat ilaa shan aan ka xasuusto Cabdi Ismaaciil, Maxamed Baashe iyo Yuusuf maxamed ciise.

Maxaa dhacay ee aad xam-xamta lahaysaan ? ayay ahayd wixii uu markii u horraysayba na weydiiyey, waxaanan u sheegnay inaanay ahayn waxan ay la yimaadeen wax ka soconaya, anagoo waliba u raacinay inaanu raashinka dawladda ku leenahay ee maalintaa aanu xaq u leenayah in dadkayaga nala tuso.
Waxba ma ogidin iyo wax maxaya ayaanu haddana is weydaarsannay. Waar nimankii SNM
ayaa saaka magaaladii Burco soo galay oo saraakiil baddanna ku laayey badankeediina haysta ee hayswaalina iyo aniga oo ugu jawaabay " bal waxaad noogu sheekaynayso eeg SNM tu ma sidii likihiibay Burco saaka uun ka soo dhex baxday ) iyo waar raashinkiina iska qaata oo uu sarkaalkii isagoo sii socda nagu soo tuuray ka dib ayaa waxaa nagu soo xoomay maxaaabiis kale inyar ka dibna waxaa yeedhay siidi ah hala xeroodo iyo askartii oo maxaabiista dhangax xagga danbe sidii adhiga kaga soo wadda.
Waxaa ii yeedhay anigoo sii galaya makhsin aan ahayn kaan u hoyanayey oo aan is lahaa inta labada xero u dhxaysa waa sidii caadada noo ahaan jirtaye turub ku soo ciyaar Xasan Cabdi oo ahaa askarigii maalintaa gaadhka haystay. Xasan Cabdi wuxuu ahaa nin dhalin yaro ah waxaanu markii hore maalin haysan jiray gaadhka qaybta dilka ee loo yaqaanno ( Qabta ) wakhtigaasi oo aanu halkaa ku jirnay.
Wuxuu ahaa nin aad u fur - furan maalintiisuna waxay run ahaantii ahayd maalin noo tirsan, isagoo maalintiisa xerada nooga soo qaadi jitay ciyaaraha dubnadda iyo turubka oon dadka dilka ah loo ogolayn, waxaa kale oo uu noo samayn jiray in uu qolalka naga furo marka aanu u baahano musqusha laba amma sadex jeer maalintii halka maalinta kale mar qudhaata nalooga ogolyahay inaanu musqusha gallo, ugu danbayntiina markii aanu u wareegnay jeelka weyn wuxuu ahaa ninkii noo soo galiyey Radio aanu markaa haysanay oo jeelka mabnuuc ka ahaa.

Turub ayaan qolkan ku soo ciyaarayaa iyo Alphow qolkaagii gal in layska furiba Allaa oge ayaanu aniga iyo Xasan Cabdi iswaydaarsannay. Maxaa dhacay ( inigoo afka u soo dhuubaya ) iyo SNM tii ayaa Burco saaka soo gashay oo qabsatay oo dagaal ilaa diyaarddo laysku adeegasaday ayaa ka socda ayaanu haddana su' aal iyo jawaab isagu celinay anigoo garan la' in SNM tu iyana diyaaraddo ku dagaalamayso iyo in kale, waxaanse xaqiiqsaday in warka labada nin ee faqashta ahaa isku raaceeni uu yahay wax jira, taasi oo ahayd waxaan hore looga baran askari ku yidhaa SNM baa meel soo gashay.
Maalintaasi waxay ahayd maalintii debed iyo albaab layska furo noogu danbaysay, Xasan Cabdi oo mardanbe qolkii aan ku jiray iigu yimidna waxuu ii sheegay in


Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

baskii raashinka noo siday la celiyey isagoon wax raashin ah laga soo dajin, waxaanu ii raaciyey inaanu ku farro adaygno waxaanu imika haysanno. Kow iyo sodonkii bishana waxaan furay warqad uu buuri ku jiray oo uu yuusuf Max'd Ciise oo qolkale ku jiraa iigu soo dhiibay askari, warqaddaasi buurigu ku jiro oo uu hoosteeda iigu soo qoray inay BBC-du waraysaray Ax'd Siilaanyo iyo in Hargaysaba la soo galay.

Siciid Sara kac oo ahaa askarta jeelka ahaana askari u dhashay deegaanka madheera ahaana nin iska da' weryn oon dhibaato badnay ayaa soo hoos maray daaqadda aan hoos jiifsado oon markaa taagnaa, iyadoo maalintaasi dagaal xumi uu ka socday meel aan jeelka aad uga sii dheerayn, gariirka iyo xabaddubana ay ahaayeen kowo aad noogu soo dhaw. Siciid maxaad sheegtay iyo waa nabad ka dib ayaan Siciid weydiiyey meesha gariirkaasi ka dhacayo intii aanu Siciid ii sheeginna wuxuu i weydiiyey bal inaan wax raashin ah haysanno iyo in kale. Wax yar baanu haysanaa iyo kiiloo bariis ah ayaan ku siin doonaa haddii aad ii sheegto meesha dagaalkaasi ka dhacayo iyo waa Cadaadlay oo waliba ay nimankii qabsadeen ayaanu subaxaana aniga iyo siciid Sarakac isweydaarsannay anigoo siiyay labadii kiiloo ee bariiska ahaa ee raashin noogu danbeeyey mid ka mid ah.

Waxay ahayd shantii iyo afar iyo toban daqiiqo markii xabaddu ay ka dul qaraxday todoba boqol iyo konton maxbuus oo ku jiray jeelka Madheera, waxaan ku jiray qol ay ku jiraan beelaha dawladda taageersan halka anagu aanu ka ahayn lix nin intayada ka soo jeeda beelaha taageersan ururka SNM. Waxaanu isku qol ahayn nin la odhan jiray Max'd dhegaweyne oo ay Max'dCali ( labadoodaba Alla ha u naxariistee ) ay saaxiib ahaayeen, ninkaasi oo Max'dCalina u wadi jiray gaadhi dhafoor qiiqle ah markuu Max'dCali watay jabhaddii afraad ee dagaalkii soomaali galbeed, waxaana Alla ha u naxariistee Dhagaweyne iyo nin isna jeelka nagula jiray oo Hawiye ahaa lana odhan jiray Xaashi la soo xidhay markuu Alla ha un naxariistee Max'dCali goostay.
Markii ay cabaar xabddu dhacaysay ayaanu shantayadii nin ee kale ee Isaaqa ahaa isugu nimid booskii Dhagaweyne, anagoo Max'd weydiinayna bal inuu nooga warramo waxa uu u malaynaayo dagaalka dhacaya. Alla ha u natariistee isagoo markaa gacanta ku hayey kitaab quraana oo uu akhriyayey ayuu Max'd intuu dhoolo cadeeyey nagu yidhi " waar illayn qolbaan idinkula jiraa waxba ma arkayee orodoo ninwalawba booskaagii ku noqo oo in Ilaahay nimankaa guusha siiyo quraanka akhtista.

Ninbaa laga hayaa ku kaadshaan nin u aqaanaaye, xaggee buu jiraa quraan akhrisku rasaastaa intay hadh beeshay ayay maxaabiistii noqotay wax beerka dhulka ku haya iyo wax shuban musqusha ugu jira mana jirin cid- cid la hadlaysa iyo wax isweydiintoona. Sheekh Daa'uud oo ahaa nin da'diisu kontonka kor u dhaaftay ahaana nin gacan ku dhiigle ah kuna xukunnaa xabsi daa' in ahaana sheekha jeelkaba tukiya oo aanu isku gogol xignay labadayada maxadna soo kala horjeedaan ayaa kor ula soo toosay tusbax uu ku wardisanayey isagoo markan faal ula kala baxay. Hadii uu riday kuna celiyey oo uu yidhi markhaatigaa anna aan isleeyahay sheekh Daa'uud baa wax la tusayaa ayaan ka soo hinqaday gogoshii aan dhabarka ugu jiifay waxaanan hadal aan hoos u dhigayo ku idhi " sheekh Daa'uud bal bahalka iiga warran" . Cabdow iska


Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

jiifso iyo anigoo isla markiiba dub ugu noqday jiifkaydii ayaa is xigay, waxaanay xabaddu dushayada si aan kala go' lahayn uga dhacaysay ilaa kow iyo tobanadii. Wakhtigaasi
ayaa waxaad arkaysay xabadda oo aad moodo inay naga sii fogaanayso siina joogsanayso anigoo dhagahaygana ay ku soo dhacayeen dhawaqa siidhi aan is idhi malaha siidhigaasi waa jabhaddii oo sii baxaysa, iyodoo markaa haddii lay saro aan bar dhiig ahi iga timaadeen . Haddii ay xabaddii istaagtay ayaa mar labaad intayadii Isaaqa ahayn waxaanu haddana isugu nimi gogoshii Alla ha u naxariistee Dhagaweyne kitaabka ku akhrisanaayey, waxaanan ku idhi " Maxa'daw maxaad u malaynaysaa siidhigaasi malaha kii dawladda maahee waa nimankii oo la jabiyay. Intuu haddana qoslay aynuu nagu yidhi " maxaa aniga i weydiinaysaan hadii laynaga jabiyo meeshana waynu arki haddii kalena awalba weynu ku jirnaye" waxaanu hore ka sii watay quraan akhriskiisii.
Waxaan ku noqday booskaygii, waxaana iigu yimid Fircoon jaamacoo oo aanu isku qol ahayn horena aanu isku iskuul u ahayn, isagoo sita arbaca turub. waxaa nagu soo biiray laba nin oo kale waxaanuna la kala baxnay arbaca turubkii. haddii ninkii u horreeyey degay ayaa waxa dib u bilaabmatay xabaddii waxaanad arkaysay afartayadii nin oo nin waliba yeeke yeeke ku daray, ninwalibana intuu turubkii dhulka dhigay ayuu gogoshiisii dib ugu noqday anna waxaan dib ugu jiifsaday gogoshaydii. waxaa mar labaad faalkii la soo sare fadhiistay sheekh Daa'uud oo intuu dhigay haddana yidhi markhaatigaa, anna intaan markan hadal soo diyaarsaday ayaa markii uu dhameeyey sheekhu faalkii aan ku idhi sheekh dee bahalka nooga warran. " cabdow nimanku waxaan dhib ahayn inoolamay iman oo waxba inaga jabinmaayaan " iyo ma dhibtan aynu ku jirno mid ka daranbaa inoo hadhay oo aan sheekha si cadho ku jirta uga hor geeyey ayaa waxaan raaciyey istaag aan sare isu taagay anigoo daaqaddii aan hoos jiifay is
kor taagay.

Waar Cabdirisaq iska warran iyo waa nabaddii aanu is dhaafsanay Daahir Max'd Jaamac oo guriga iga soo hor jeeda ku jira daaqaddana soo taagan, ayaa waxaa dhexdayada soo maray nin ka mid ahaa askarta jeelka lana odhan jiray Cabdillaahi Biric oo markaa wajiguusu aanu qurux badnayn.
Eeyaa Cabdillaahi inyar oo bariisa ma ku siiyaa malaha ilaa saaka waxba maad cunine iyo waar bariiskaabe dhacye daaqadaha ka fadhiista xabaddii xagaasay ka soo dhacaysaa yaanay daaqadaha idinkaga dhicine, haddii Daahir iyo Cabdillaahi is waydaarsadeen ayuu Cabdilllahi meel noo muuqata fadhiistay isagoo qorigiisii intuu labada lugood dhexdiisa galiyey madaxana afkiisa hore saaray, waxaanad jawigiisii hore iyo fadhigiisiiba ka arkaysay niyad jab weyn. Markan waxaa lagu dagaalamayaa meel naga yar durugsan iyadoo mararka qaar haddana xabadu dushayada ka dhacayso, waxaanad moodaysay in dagaalku laba aag ka kala socdo. Daahir Max'd Jaamac oo aanu wali sheekaysanayno aqalka uu ku jiraana iga soo horjeedo isagu arkayana waxa ka dhacaya banaanka weyn ee jeelka iyo gidaarka danbe ee jeelka ayaa mar qudha kor ugu dhawaaqay " Wallaahi waa kuwa gidaarkii danbe jabiyey " isagoo inyar ka dibna ku xigsiiyey waar waa kuwaa ayjeeshiina badhna meeshii dalooshay ka baxay badhna maadka (maadku waa qayb jeelka ka mid ah laakiin aan cidi galin oo ay ka dhisan yihiin guryo aad u gaboobay ) galaye meesha inaga jabiya.


Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Haddii aqal walba aad ka maqlayasay garaaca albaabada laakiin aanu jirin aqal kaliya oo albaabka iska jabiyey, albaabada jeelkuna ay ahaayeey kuwo xadiid ah, ayaanu aniga iyo Daahir iskaga soo noqonay daaqaddii aaanu ka wada hadlaynay iyo bal inuu Daahir gidaarkii la dumiyey dhaq-dhaqaaqiisa la socdo.
Intaa ka dib waxaad maqlaysay baasuukayaal faro ku tiris ah oo xaggayaga u soo dhacayey halka dagaalka qaybtiisii badnay naga sii fogaanayso.

Waxaa mar qudhaata nagu kulmay iyadoo markaa saacaddu ahayd labadii duhurnimo oo gaw ah, raxan ka mid ah mujaahidiintii SNM oo jeelka ka soo galay xaggii danbe ee ay jabiyeen iyo koox kale oo ka soo galay albaabka hore iyo qaybta dilka oo uu Illaahay naxariistii janno isaga iyo intii dagaalkii xaqa ahaa ku shahiidayba ha siiyee uu ka mid ahaa MaxamedCali oo ahaa sarkaalkii watay hawl galkaa jabintii jeelka madheera, waxaanan ku soo baxay ninkii sarkaalka ahaa ee Hargaysa nalooga soo badalay oo bahal curiya oo illaa maalintii Burco la soo galay, anagana albaabada nalagu xidhay waayey hilibkii uu maxaabiista la cuni jiray oo saruuradaysan oo margiga oo xabadi kaga dhacday ka hiigaaya.

Wuxuu ahaa dagaal aad u culus iyadoo ciidamada faqashta ee goobtaa jeelka ka dagaalamay tiradooda lagu qiyaasay in ka badan sideed boqol oo askari kana mid ahaayeey ciidamadii laga qabsaday Cadaadlay, kuwii xerada madheera iyo kuwii qaybta kaydka hubka ee Barta iyo waliba ciidamo ka mid ah daraawiishta Hargaysa oo ahaa kuwii soo qaaday kontomeeye odayaal ah oo laga soo xidhay magaalada Hargaysa. Waxaad arkaysay maydka askarta faqashta oo raxan-raxan madaxa iskula jira halka jabkii firxadkoodu ay ka soo jeesteen dhankaa iyo dhinaca magaalada Berbera.

Qaybtii Labaad:

Waxa maalintaa soo gabo-gaboobay, kun, afar boqol iyo kow iyo lixdan maalmood (1461) oo u dhiganta afar sanno iyo laba maalmood oo aanu gacanta ugu jirnay aniga iyo saaxibaday taliskii siyaad barre, mudadaasi oo kun, sadex boqol iyo sagaal iyo sodon maalmood (1339) oo ka mid ah una dhiganta sadex sanno iyo badh aanu ku jirnay jeelka madheera.

03- 10- 1984

Haddii waaga uuni uu baryay taariikhduna ay tahay ta kor ku xusan ee sadexdii oktoobar kun iyo sagaal boqol iyo afar iyo sideetankii, ayaa waxaa naloo qaaday dhankaa iyo maxkamaddii badbaada dalke ee Hargaysa. Taasi oo sagaal iyo labaatankii sibtanbar lagu dhagaystay dacwad lagu soo oogay sideed iyo toban arday oo aan ka mid ahay, gabayaaga weyn ee caalka ah waa Cali Xasan Roodhiile'e (Cali Banfas) iyo cabdi dhamac oo ahaan jiray markii hore nin ganacsade ah.

Maxkamadda iyo agagaarkeeda ayaa ahaa mid aad iyo aad amaankeeda loo xoojiyey, ciidamaduna ay sida ayaxa u daadsan yihii meelo maxkamaddaba ka durugsan, halka


Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

wado kasta oo maxkamadda soo gasha iyo maxkamadda hareeraheedaba loogu wareejiyey beebeeyo.
Waxaa maxkamadda hor tubnaa dad aad u tiro badan, halka maxkamadda gudaheeduna uu ahaa mid buuxdhaafay.
Haddii aanu wax yar uun fadhinay ayaa waxaa soo galay gudoomiyihii maxkamadda badbaadada dalka waa Maxamuud Geele Yuusufe iyo labadiisii ku xigeen. Waanu istaagnay dhamaantayo, haddaanu nahay eedaysanayaashayadii iyo hadday noqoto dadkii u yimid dhagaysiga xukunkayaguba iyo hadday noqoto todoba qareen oo na difaacayayba, markii Geele iyo saaxiibadii ay fadhiisteena waanu fadhiisanan.

Geele: maxkamaddu way furanrahay waxaanan idiin sheegayaa in maxkamaddu haddii cid ay xukunto aan la ooyi karin, haddii cid ay sii daysana aan la mashxaradi karin.
Haddii Geele uu intaa hordhac uga dhigay xukunkiisiina wuxuu hadana raaciyey: fadhigii ay maxkamadda badbaadadu yeelatay bishii sibtamber sagaal iyo labaatankeedii waxay maxkamaddu dil toogasho ah ku xukunta eedaysanayaasha kala ah.

Cabdirisaq Sheekh Ibraamim Kooshin - dil toogasho ah
Yuusuf Maxamed Ciise - dil toogasho ah
Cabdiraxiim Maxamed Baaruud - dil toogasho ah
Cabdi Ismaaciil Maxamuud - dil toogasho ah
Axmed Sheekh Ibraahim Sheekh Cumar - dil toogasho ah
Maxamed Baashe Aw Cali - dil toogasho ah
Cabdi Dhamac Caabi - dil toogasho ah
Haddii magacyadaasi aanay afka Geele ka soo wada bixin, ayaa waxay dadkii maxkamadda ku jiray oo dumar u badnaa ay la oogsadeen hoogayoo ba'ayeey iyo qaylo mar qudhaata buux dhaafisay qolkii maxkamadda tin ilaa cidhib.

Maxkamaddu siday idiin sharaftay halloo sharfo oo uu laba, sadexjeer ku celiyay Maxamuud Geele yuusus una yidhi si adag oo dadka baqo kalisayna wuxuu raaciyey: sagaal arday oo kale oo uu ku xukumay xabsi daa'in, sadex arday oo kale oo uu ku xukumay min sadaex sanno iyo Cali Xasan Aadan (Banfas) oo uu ku xukumay shan iyo toban sanno oo xadhig adag ah.

Isla markiiba waxa maxkamaddii laga dareeriyey dadkii ehelka, qaraabada, asxaabta iyo shicibka ahaa anagana waxaa nalagula boobay katiinado. Wax yar ka dibna waxaa nalagu guray gaadhi madoobe dheere ah oo ay dhinacyada ka saaran yihiin ciidamadii siyaad barre ee daraawiishtu, halka ay ciidamada milatariga iyo tiknikadooduba ay xagga hore iyo xagga danbaba nooga daadihinayeen. Waxaa nala soo mariyey wadada marta dhakhtarka Hargaysa dabadiisa anagoo u haysana in nala gaynaayo jeelka Hargaysa, waxaanuse garannay in nalagu wado meel kale markii baabuurtii ilaalada ahayd iyo kii nasidayba ay jeelka xawaare ba'an ku dhaafeen cagtana saareen dhankaa iyo wadada laamiga ah ee Berbera u baxda, iyadoo markaa maskaxdayada ay ku soo dhacday in nala gaynaayo madheera amma labaatan jirow oo aan sheeko uun ku maqlay ahaydna halka ay ku xidhnaayeen kooxdii la odhan jiray ufo.

Waxaanu xaqiiqsanay in nala gaynaayo Madheera markii baabuurtu nagala leexatay


Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

tuulada Abdaal, iyadoo inta u dhaxaysa Abdaal ilaa jeelka ay ciidamo milatari ahi tallaabo takllaabo u daadsanaayeen. Wuxuu gaadhigii na siday galay gudaha jeelka halka kuwii ilaalada ahaa ay albaabka hortiisa nagaga hadheen, waxaana nalagu wareejiyey askartii iyo sarkaalkii haystay jeelka Mandheera.

Waxaa naloo qaybiyey laba kooxood waa kooxdayadii dilka ahayd iyo kooxdii kale ee xadhiga ahyde, waxaana nalaga furay katiinadihii maxkamadda nalagaga soo xidhay iyadoo naloogu badalay mid kale oo la yidhaa dhafoor maroodi taasoo ay isticmaalaan askarta jeelku. Waxaa isla markiiba todobadayadii dilka ahaa loola cararay qaybta dilka ee loo yaqaan " qabta " qaybtaasi oo loo sii maro lix albaab oo soo kala horeeya iyo albaabka u danbeeya ee qolka aad ku xidhantahay. Waxay ka koobnayd sideed qol oo afarba dhan ka soo jeedaan iskana soo hor jeeda waxayna ahayd meel madaw, fool xun, uskag badan isla markaana aad arkaysay qolalka ay ka koobantahay oo ay ka soo jeedaan dad raamaystay, waxaanay maalintaa u horaysay noola ekayd ammaba ay ahayd meel yaab iyo argagax badan. Tiraba labaataneeye qof oo kujiray ayaa wakhtigaa badhna soo taagnaayeey albaabada qolalka oo garaa' id ahaa badhna soo kada loobeen, waxaana markii askartii nawaday iyo kuwii gaadhka ahaaba naga baxeen, lana kala baxnay buste buste nala siiyey nala hadlay nin weyn oo gadh weyn lahaa lana odhan jiray Sheekh Ismaaciiil Carab, ninkaasi oo ahaa nin baayac mushtari ah dukaan weyna ku lahaa magaalada Hargaysa kaasoo ay alla ha u naxariistee aadan shiine ilmaadeer ahaayeen sida aanu markii danbe ogaanay. Sheekhu wuxuu naweydiiyey intayada saraakiisha ah iyadoo Maxaabiista iyo askartaba loogu sheegay in la keenayo niman saraakiila oo SNM ah lana soo qab- qabtay, waxaanuse u sheegnay inaanu ahayn arday dhiganaysay dugsiyada sare ee magaalada Hargaysa.

Waxay maalintaasi ahayd maalin Arbaca ah, isla jimcihiina waxaa noo yimid dad boqollaal ah oo ka koobnaa shacbi weynaha magaalada Hargaysa, waxaanay maalintaasi noo ahayd maalintii noogu horaysay dad shicib ah muddo sadex bilood ah oo aanu ku xidhnayn qaybta lix iyo tabaatanaad amma fooqii loo yaqaanay fooqa gaani. Subaxnimadii maalintaasi ilaa gabal dhiciina waxaanu fadhinay xafiisyada hortooda halkaasi oo marba koox shicib ahi nagu soo booqanaysay, waxaanay dadka badiduusu ahaayeen kuwo indhahooda ay ilmadu ka da' ayso iyagoo waliba sidaa doonayay inay anaga noo calool adaygaan, qofkastaana wuxuu noosheegayey ingaani loo tagay oo saamaxaad naloogu maqanyahay, waxaanse wasuusanayey tuduc ka mid ah gabay uu lahaa Cali banfas oo ahayd " aabaha ha saamaxo la leeyahay, waa orgamihiiye ".

Dilkii u horreeeyey ee alle ha u naxariistee caano boodhe iyo kuwii ka danbeeyey.

Hadii aanu ku jirnay labo wiig dadka qofkii noo yimaadaana noogu bushaaraynaayo sii dayntayada, dadkii dilka ahaa ee aanu qabta ugu tagnayna ishoodii is badashay ka dib markii nooc wal oo raashin ah oo naloo keenaba aanu qayb tooda siino, aanad arkaysay dadka wajiyadooda oo soo diiraya iyo xataa meeshii oo dhaq-dhaqaaqeedu batay, yaa duhurnimadii maalin arbaco ah waxaa soo galay qabta askarigii maalintaa meesha haystay iyo dhawr askari oo uu wato. Wuxuu is hortaagay alaabkii garaa' idka ahaa ee mid ka mid ah qolalka qabta oo uu ku jiray nin la odhan jiray caano boodhe, askarigaasi oo sadex xadhigle ahaa lana odhan jiray muuse kuu kuu.


Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Muuse Kuu Kuu: waar mee caano beedhe.

Caano Beedhe: waa i kan.

Muuse Kuu Kuu: waar bal dharkaaga cad xidh oo soo bax waxaan u malaynayaa inuu viisad kuu yimide. Isagoo muuse sii furaya albaabkii qolka uu caano boodhe ku jiray.

Caano Baadhe: (00 ilaahay ha u naxariisree maalintaa maalin ka hor timaha iska sii xiiray, cidiyaha iska sii guray isla markaana xidhnaa dharkii caddaa ee dilka). Waar ina mari viisadna noomuu imane waa nala qaadayaaye.

Maalinta Arbacada iyo maalinta Jimcuhu waxay barigaa ahaayeen maalin ay maxaabiista qaraabadooda amma asxaabtooduba ay soo booqato halka markii danbe maalinta jimcaha uun laga dhigay, maalinta arbacaduna waxay ahayd maalinta la qaado qofka la dilayo, iyadoo sharciyan ay u qornayd qofka in la qaado lana geeyo meeshii laga soo xukumay si maalinta khamiista ah todobada subaxnimo loogu fuliyo dilka toogashada ah.

mar haddii la soo celin waayey garanay in caano baadhe la qaadaye, waxaanuse is leenahay naftana ku sasabaynaa saw ma dhici karto in meel kaleba oo qaadaa, waxayse runi runteed tagtay markii gaadhkii subaxnimadii khamiista ahayd soo galay noo sheegeen in saaka todobadii subaxnimo caano beedhe lagu toogtay magaalada Burco sidaasina uu sheegay warkii sideeda subaxnimo ee radio Muqdisho. Waxay maalintaasi kaga duwanayd maalmihii danbe, waxay ahayd maalintii noogu horaysay ee nin aanu meel ku wada jirno lagu fuliyo xukun dil ah, waxaanay ahayd maalin ka naxdin badan maalmihii danbe oo raggu uu isku badalakay gasariir qofka la qaadayana la odhan jiray " waa wax yar baanu kaa danbaynaynaaye waa inoo aakhiro iyo qabriga " maalintaasina waxay ahayd maalin nin waliba intuu quraanka ka yaqaanay sodon goor kor iyo hoosba u akhriyey.

Dilkii Alle ha u maxariistee Cabdilllahi Dheere Iyo Yuusuf.

Cabdillaahi Dheere wuxuu ahaa nin u dhashay jiida Gabiilay ilaa alaybaday, waxaanu reerkoodu ahaa beeralay. Cabdilllaahi waxaa loo iman jiray labadii biloodba mar, maalintaasina waxay ahayd maalinta noogu warka dagaalada amma SNM ta badan. Waliba waxaanu u jeclayn maalinta cabdillaahi dheere ay hooyadii u timaado, iyadoo cabdilaahi hooyadii ahayd war galeen waliba ku darsatay dhiirranaan iyo baqasho la'aan aanay ka baqan jirin askarta dhinacyadeeda tuban.

Waa maalin arbaco ah waana maalmahaa hore ee ay isku jireen dadka qaadistooda iyo soo baaqashadoodu, waa goor duhur ah waxaana noo yeedhay cabdillaahi dheere iyo nin kale oo markaa qabta wax yar uun nagula jiray, waxaanay ahayd wakhti ku beegan kalkii cabdillaahi loo iman jiray. Waxaa nalaga kaxeeyey cabdillaahi iyo yuusuf iyadoo sidii caadada u ahayd askartu markii hore ku kaxaysan inay u malaynayaan in cidi u timid, cabaar haddii cabdillaahi iyo yusuufba naga maqnaayeena waa la soo ciliyey iygoo askarina daba socoto.


Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Waar cabdillaaci ma hooyaa kuu timid mise cid kale, ayaa mar qudhaata ka soo kala yeedhay dhawr qol oo maxaabiistii ku xidhnay ay albaabka taagnaayeen. Waar maye kii kalaa yimid iyo kee iyo kii kale dee, ayay hadana is dhaafsadeen cabdillaahi iyo laba nin oo kale oo cabdillaahi ay isku qol ahaayeen, ugu danbayntiina wuxuu cabdillaahi sheegay in dilkoodii uu barrito yahay laguna yidhi soo qaata gogoshiina barritaa laydin tooganayaaye. Iyadoo wakhtigaasi ay ahayd wakhti ay qadadayadii bisishahay ayaa waxaanu ka hodsanay askartii maalintaa gaadhka haysay in aan nimanka gaajo lagu kaxayn ee la sii qadaysiiyi, haddii ay si wanaagsan u qadeeyeena waxaa qalkii aan ku jiray isasoo hortaagay yuusuf isagoo na weydiistay inaanu xabad sigaar ah u shidno. Siintii yuusuf aanu xabad sigaara siinay una shidnay iyo dhaqaaqii uu naga dhaqaaqay in yarna uu naga sii maqnaa, ayuu nagu soo noqday yuusuf oo xabaddii sigaarka ahayd ka bakhtiday. Waar bal ii shida hadana xabaddii sigaarka ahayd wey iga bkhtidaye oo malaha waan yar sakatiyaye ayuu hadana yuusuf si geesinimo ah noogu yidhi, anagoo aad ula yaabnay ninkaa iyo calool adkaansiisa uu xaalidiisa ku tilmaamay mid fudud oo sakati ah.si wanaagsan ayaanu u sii sagootinay cabdillaahi dheere iyo saaxiibkii yuusuf anagoo ilaahay uga barinay inuu ka yeelo kuwii naftu si dhib yar oon silic lahyn uga baxdo.

Dilkii Alleh ha u naxariistee saaxiibkaygii arbaca turubka i baray waa Caddeeye'e iyo ninkii jilaaga ahaa ee la odhan jiray Dhucda iyo Maxamed Faroole.

La soco qaybta sadexaad iyo wixii dhacay jebintii jeelka Mandheera ka dib maalinta Axada ah haddii eebe idmo.

Abdirisaq Sheekh Ibraahim Kooshin
Abdirisaq Alpho
abdirisakalpho@yahoo.co.uk

## Qaybtii saddexaad

## Afduubkii Diyaaraddii Somali Airline ee24-kii November 1984

Isbadalkii labada gaadh, waa gadhkii xalay iyo kii saaka soo galaye iyo tirsashadii gaadhkii subaxaasi uu na tirsaday ka dib, ayaa waxaa soo galay mid ka mid ah laba maxbuus oo ka shaqeeya qabta uuna daba socdo mid ka mid ah askartii subaxaasi gaadhka ahayd oo la odhan jiray Ceelaabe. Qabta oo sideedaba ahayd meel qaab dhismeedkeeda iyo qaab nololeedkeeduba aad u adkaa waxaa sida caadada ah albaabada nalaga furi jiray laba xilli oo kala ahaa subaxa hore iyo galabtii. Labadaa xilli kaliya waxaa naloo saari jiray kaadi tag iyadoo marba qol la kaadi gayn jiray, wixii ka danbeeya furitaanka galabtii iyo tirinta uu na tiriyo ninka maalintaa gaadhka haystana muu jiran furitaan danbe oo layska furaayey ilaa subaxnimada danbe. Waxaa albaabka qolalka noo horyaalay daasado ah kuwa lagu keeno caanaha budada waa caano beedhe'e kuwaasi oo uu ku kaadshi jiray habeenkii hadba qofka ay kaadiyi qabataa, halka aanu saxaradana u isticmaali jirnay baco haddiiba


Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

ay dhacdo in qof habeenkii
saxaro qabataa. Waxaa markaa qabta ka shaqayn jiray laba maxbuus oo laga keeni jiray xerada weyn, had iyo jeerna waxaa naloo soo xulijiray laba maxbuud oo u dhashay gobolada lagaga hadlo afka loo yaqaan May-mayga si uu u yarado is fahankayagu. labadaa nin mid ka mid ah oo afka soomaaligiisu waxooga dhaamay ka kale ayaa markaa subaxii kolba noo sheegi jiray wixii warar ah, wararkaasi oo qolada jeelka ku jirtaa ee asxaabtayada ahayd noogu soo dhiibi jireen, halka maalmaha qaarna wararka naloogu soo qori jiray warqad buuri ku jiro hoosteeda, in karta oo taa inamada shaqaalaha noo ahi ka biqi jireen in lagu qabto.

jeedsashadii uu Ceelaabe ku jeestay makhsin looga yeedhay, ayaanu anaguna ninkaa maxbuuska ahaa oo markaa naga qaadayey daasadkii kaadidu ku jirtay aanu ku nidhi waar Ibraahim maxaa cusub. Intuu hareeraha iska eegay afkana soo saaray albaabkii garaa'idka ahaa ayuu si xanshashaq ah noo yidhi " waar iska aamusa diyaarad ayaa laydiin afduubaye " intaa ka dibna wuu naga dhaqaaqay isagoo hareeraha eegaya kana baqaya in askarigu arko isagoo wax noo sheegaya. Farxad, fajac iyo amakaag ayay nagu noqotay warkaa kala dhiman ee uu ninkaasi noo sheegay, anagoo aan fursad danbe u helin inaanu ninkaa wax ka sii weydiino siday wax u dhaceen iyo cidda Diyaaradda af duubtay, habeenkaana waxaanu seexanay anagoo waran nagu taagan yahay. Mid ka mid ah sideeda qol ee qabtu ka kooban tahay ayaa waxaa xiligaa ku jiray nin la odhan jiray Dabo geel oon isagu dil ahayn ee ciqaab ahaan uu u keenay ninkii jeelka haystay, waxaana subaxii danbe ee maalintaa diyaaradda la af duubay lagu soo
lamaaneeyey ninkaa Dabo geel Cali Xasan Aadan ( Cali Banfas ) . Subaxnimadaa waxaa jeelka soo gaadhay liisklii ay codsadeen nimankii diyaaradda afduubay oo ay kaw ka ahaayeen kooxdayadii madheera ku jirtay, waxaana Cali Banfas markii uu magaciisa liiskaa ku arkay yidhi qabta geeya taliyihii xabsiga madheera Saalax oo loo sheegay inuu ninkani yahay ninka gabayaaga ah ee Afweyne qaaq kaga siiyey. Wakhtigaasi wuxuu ahaa wakhti jeelka weyn loo ogolaa dhagaysiga idaacadaha waxaanay dad badani haysteen Radio iyo halka maalintaa wixii ka danbeeyey laga mabnuucay. Waxaa noo yimid Cali Xasan ( Banfas ) oo soo dhagaystay wixii idaacad Af soomaali, English iyo Carabiba ku hadlaysay, waxaanu Cali naga dhargiyey wixii war ahaa ee diyaaraddaa ku saabsanaa iyo halka xaal markaa marayey. Todoba cisho oo diyaaraddaasi maqnay, lix casho oo ka mid ahaa waxay ahaayeey lixdii casho ee noloshayada kolayba ugu farxadda badnaa, jawigayaguna hadba wuxuu la jaan qaadayey marxaladaha kala duwan ee
hadba wararka diyaaraddu marayeen. Itoobiya ayaa layna gaynayaa, maaha waxaa la yidhi Masar ayaa dhex-dhexaadinaysa oo Qaahira ayaa laynoo qaadayaa, maahee talyaaniga ayaa ku dhex jira oo waxaa layna gaynayaa Rome, waxaanu hadba caasimad wadan leeyahay ka dagnaba waxaa maalin jimce ah oo naloo yimid naloo sheegay inuu afweyne Alla uma naxariistaan uu diiday wax alla wixii shuruud lagu xidhay diyaaraddaa, haday noqoto sii dayntayada iyo hadday noqoto inuu dilka naga jabiyaba, diyaaraddiina barri sabtida ku soo noqonayso soomaaliya oo la soo dayn doono.

Waxa kale oo wakhtigaa qabta naloogu keenay xaaji Cabdi cawad ( indho deero ) iyo


Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

koofiyad dheere, isagoo wkhtigii diyaaradda la afduubay indho deero joogay dalka yaman waxaanu nooga waramay sidii ay wax u dhaceen. Xaaji Cabdi iyo koofiyad dheere waxay ka soo hadheen afartan qof oo lagu toogtay magaalada Burco sanadkii afar iyo sideetankii, kuwaasi oo lagu soo oogay inay ka mid yihiin S.N.M.
Dilka afartankaa qofi wuxuu meesha ka saaray sheeko aanu isku maaweelin jirnay oo ahay " waar afweyne ma wuxuu ku dhacaa inuu todoba nin oo Isaaqa oo arday ah uu mar qudhaata wada toogto, iyo waliba walaahi inaanu inaga danbaynayn haddii uu ina toogto, labadaa arimood oo ay soo gunaanadeen arintaa foosha xumayd ee ka dhacday Burco oo aanay jirin wax gadood ah oo shicibku ka muujiyay.

Shan iyo labaatankii November ee sanadkaa afar iyo sideetankii ayuu ahaa wakhtiga uu noo qornaa dilkayagu kaasi oo uu Afweyne hore arjigayagii cafiska ahaa uu kaga soo jawaabay iimaansada, Sida uu ii sheegay Aabihii afduubka diyaaraddaa somali airline Alleh naxariistii janno ha ka waraabiyee Cawil Cadami, oo markaa ka shaqaynaayey xafiiska Ismaaciil Axmed Ismaaciil taliyihii ciidanka asluubta Soomaaliyeed. ( Cawil Cadami, waxaanu ku kulanay Tuulada Aadan Waraabe jabintii jeelka ka dib ), waxa kale oo jirtay maalintaa afduubka diyaaradda maalin ka hor oo uu gaadhka lahaa ninkii la odhan jiray Xasan Cabdi ee aan qaybtii hore ee sheekada ku xusay, ayaanu Xasan Cabdi soo galin gudaha qabta, waxaanay gaadhkiisii baxeen anagoon arag Xasan Cabdi baxdo iyo dhacdo. Maalin sadexaaddii oo uu gaadhkii xasan Cabdi soo noqday ayaa markii subaxnimadii naloo furayey kaadi gaynta, ayaan aanigoo aan wali musqusha galin cadayanayana aan askarigii markaa albaabka naga furay oo la odhan jiray
Muuse ku idhi " waar Muuse ilaa dorraad Xasan Cabdi maanaan arage maxaa ku dhacay.

Muuse: doraad ayuu yara wis-wisay. isagoo Muuse madaxa hoos u dhigaya.

Alpho: oo maxuu ka wis-wisay ee ku dhacay. anigoo aad u shakiyey.

Muuse: maalintaa gaadhkayagii hore ayaa ciidan duub cas ah la keenay jeelka markaasaa nalagu yidhi ardayda ayaa la tooganayaa, markaa wuu idiin soo gali kari waayey. isagoo isaga laftiisu yara naxsan.

Alpho: oo imika meeyey ciidankii ? Anigoo isuba qaatay in lay toogtay aadna u naxsan.

Muuse: subaxnimadii danbe ayaa la qaaday. isagoo iga sii dhaqaaqaya.

Wakhtigaasi wuxuu ahaa wakhti ay buuraha gacanlibaax ka socdaan dagaaladii kun iyo sagaal boqol iyo afar iyo sideetankii,(1984-kii) waxaanu Cali Banfas noo sheegay in taliyaha
xabsigu uu maalin walba la hadli jiray Xamar isagoo leh waxaa lala baxayaa ardaydii dilka ahayde sida ugu dhakhsaha badan dilka ha loogu fuliyo.

Keenistii Cali Banfas na loogu keenay qaybta dilka isaga yeelkadiiye waxaanu anagu ka hellay warar faro badan iyo waliba maaweelo isuga jirta gabayo iyo sheekooyin, isagoo intuu qabta nagula jirayna tiriyey laba gabay iyo masafo.


Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Fiidkii galabnimo jimco ah oo dadkii noo yimid noo sheegeen dagaalkii Burco duuray iyo geeridii Alla ha u naxariistee mujaahidkii weynaa ee Max'd Xaashi lixle, ayaa Banfas isasoo taagay albaabka qolkii uu ku jiray oo qolkii aanu ku jirnay ugu toosan xag shan iyo afartan digrii ah.

Cali Banfas: Cabdirisaq ma haysaa wax waraaqo ah ( isagoo yara guuxaya )
Alpho: Waxaan hayaa dhawr kartoon oo caleentii shaahu ku jirto. Waxaa wakhtigaa naloo keeni jiray caleen shaah oo ku jirta kartoono yaryar oo huruud ah illaa kiilloona qaada, warqad cadina kartoonka iyo shaaha u dhaxayso kaasoo lagu soo sameeyey dalka Kiiniya.
Haddii aan caleentii ku jirtay karaatoonta isugu geeyey daasad caano niidoo ka dhamaaday daasaddiina aan ku soo fadhiistay albaabka hortiisa, Calina soo taaganyahay albaabka qolkiisa walina uu guuxayo aanan u sheegay inaan diyaar ahayna wuxuu guuxiisii isku badalay masafada dheer uu uu yidhaa " HADAANAN HADAANAN, HADAANAN GADOODKA LIXLOW GU' GA MAANTA LA SOO HADHIN GUUSHA".
Cali Banfas ayaa wuxuu iga codsaday gabay aan tiriyey kun iyo sagaal boqol iyo laba iyo sideetankii maalmihii dhagax tuurka, kaasi oon Cali hore ugu tiriyay maalmo aanu ku jirnay jeelka hargaysa oo ahayd maalmihii dacwadayadu socotay. Haddii maalintaasi ay ahayd maalin dagaal ba' ani ka dhacayo nawaaxiga Cadaadlay iyo buuraha gacan libaax, gariirkuna aanu maalintaasi oo dhan ka la go'in anna aan ku soo gunaanaday tixdii Cali i weydiiyey tuducyadii ugu danbeeyey oo ahaa :

Dirirtaan gingimay maalintii, dhagaxu guuxaayey,
Juun iyo maalintii gacab libaax, gaadhka lagu meershay,
Oomaar dharaartuu gurdamay, gumaca jiidhaayay,
Maxamuud dharaartuu ganbiyey, weerar iyo gaadmo,
Wacdaraha dharaartaan gaystayey gubatay waanwaani,
Gumadaay dharaartaan lahaa, dhalinay guushiiye,
dharaartuu xaqaygii gudhnaa, giijay ibihiisa,
Duqaydii nac-naca loo gadaa gooni joogsadaye,
Waxse nala gudboonaa inaan gaydh, u dirirnaaye,
Kolhaddii waxaan uga gollaa, layla garan waayey,
Gam'i maayo jeeroon hantiyo, gacaladaydiiye,
gulufyada laheenseeyey iyo, gaasaska aan dhawro.

Wuxuu Cali Banfas hore ka bilaabay gabay dhawr boqol oo bayd ah aanu ku bilaabay "Cabdow gaasaskaad dhawrraysaa, maanta soo galaye.
Waxa kale oo uu Cali intii uu qabta nagula jiray uu dhamays tiray tix gabay ahayd oo uu unkay maalintii markii dilka nalagu qaaday, saati oo uu markii geelle uu xukunkayaga dhameeyey uu Cali yidhi " haw baqab Bidhiidhaw wakhtigi ways badalayaaye " Bidhiidh waa Ilaahay ha u naxariistee Cabdiraxiim Max'd Baaruud oo ka mid ahaa todobadayadii dilka ahaa.


Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Dilkii Cadeeye, Dhucda iyo Max'd Faroole.

Maalinta Arbacadu waxay maalmihii danbe isugu soo biyo shubantay maalinta la qaado dadka dilka ah, waxaana la joojiyay booqashadii dadku ay soo booqan jireen dadkooda xidhan. Cida kali ah ee inay Arbaca tahay noo sheegi jirtay nana xusuusin jirtay wuxuu ahaa Sheekh Ismaaciil Carab oo iasgu ahaa qofka kaliya ee loo ogolaaday in saacad loo keeno. Sheekhu isaga ayaa maalintaa odhan jiray" waar waa Arbaca eey" manay jirin wax sheeko ah amma hadal ah amaba ciyaaro ah ( turub iyo dubnadtoona ) oo maalintaa aad ka maqlaysay amma lagu ciyaarayay qabtu, maxaabiistuna waxay ahaayeen kuwo qaadis u joog ah. Xataa waxaa maxaabiista ku yaraa dhaqdhaqaaqa, waxa qudhaata oo aad arkaysayna waxay ahayd quraan akhris iyo wardiga oo tusbaxo dhagtaa hayo. Arbacooyinku sii kala darane haddii sheekhu uu yidhaa " waar waa Arbaca bil u danbaysana " maxaabiistu waxay wada lahaayeen il geeriyaad.

Waxa kale oo jirtay laba cisho ka hore maalintaasi ayaa mid ka mid ah inamadii noo shaqayn jiray uu noo sheegay in xabashida jeelka ku jirtaa ay sheegeen inay jeelka meel u dhaw ka soo qodeen shan xabaalood, waxaana labadaa cishaba farta wadnaha ku hayey isku kiis ahaa oo ka koobnayd shan qof iyagu ahaa kuwa kaliaya ee maalintaa isa siiyey in la qaadi doono, waxaanuse aad uga yaabanayn xabaalaha jeelka agtiisa laga qoday iyadoo qofka lagu toogan jiray magaaladii laga soo xukumay.

Waxay saacaddu dhagta haysaba wakhtiguna uu yahay mid aad moodo inuu maalmaha kale
ka gaabinayaba waxaa na dhaafay wakhtigii dadka la qaadi jiray oo u dhaxaysa salaadda duhur ilaa salaadda casar.Mar qudhaata ayay dadka afkooda ka soo wada booday naqas weyn oo goorahanba ku taagnaa markaasaa makhsin walba ay dabadda uga soo baxday Alxamdulillaahi Rabil caalamiinta ay maxaabiistu Ilaahay ugu shukri naqayaani. Layska sheekaysay, lawada hadal, sigaarkii buftaa lagu hayay saaka oo dhanna lagu badal raashin iyo qofba wuxuu cuni karo oo anigoo dhabarka ku haya gidaarka makhsinka aanu ki jirno ayaa Cabdi Ismaaciil oo albaabka kanbadhuudhay dub u soo baxay kuna soo tiirsaday gidaarkii aan dhabarka ku hayey.

Cabdi Ismaaciil: caawa waxbaa la qaadayaa. Cabdi Ismaaciil wuxuu takhasus ku noqday dhaqdhaqaaqa askarta maalmaha wax la qaadayo wuxuuna markii danbe noqday inuu sii sheeko marka wax la qaadayo.

Alpho: Waar Cabdi imikaynu nafisnaye inagadaa yabaal danbe taag uma hayno'e.
Cabdi ismaaciil: Wallaahi wax baa la qaadayaa.
Alpho: maxaad aragtay eed ka shakiday.
Cabdi Ismaaciil. Daahir Xasan ( waa ninkii haystay askarta maalintaa gaadhka haysay ) wuxuu guntanaa go cad mid kalana wuu hagoognaa, wuu iska bixiyey oo wuxuu soo xidhay dirayskiisii, dab uu halkaa goori dhoorka ku shitayna wuu bakhtiiyey, hebel iyo henbelna halkaasay isa soo taageen.


Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Haddii Cabdi intaa yidhi anna aan aad u dhagaysanayo ayaa waxaa sanqadhay silsiladda dheer ee dadka marka la qaadayo lagu xidh-xidho oo ku duubnayd albaabka hore ee qabta laga soo galo.Shaki kuma jiro in wixii Cabdi sheegayay ay dhab tahaye habeenkaa waxaanu is nidhi kuwa la qaadayaa waa idinka oo laga baqay in maalin cad laydin qaado. Waxaa soo galay Daahir Xasan oo wata ilaa labaatan askari. Badnidaa askarta iyo Daahir Xasan oo siduu u soo socday isasoo hortaagay makhsinkii aanu ku jirnay anagoo afar ah iyo waliba ka dhaqaaqiddii uu naga dhaqaaqay isna hortaagay makhsinkii kale ee sadexdayadii kale ku jireena( todobadayadu waxaanu ku kala jirnay laba makhsin oo afarna ay mid ku jirtay sadexda kalana mid kale ) waxaanu isasii dhacsiinay in aan shaki ku jiran cidda la qaadayaa inay anaga tahay. Daahir xasan intuu ka dhaqaaqay makhsinkaa kale oo Max'd Baashe iyo ay ku jirraan ayuu is hortaagay makhsin ka soo hor jeeday waxaanu yidhi mee Caddeeye iyo way kan. Dharkaaga cad gasho iyo waaban gashanahay haddii lays dhaafsadayna wuxuu u dhaqaaqay makhsin kale oo uu ku jiray nin lo odhan jiray Max'd Farroole da' ahaana aad u weynaa. Mee Max'd Farroole iyo waykan iyo dharka cad gasho haddii lays waydaarsadayna wuxuu Daahir Xasan u sii dhaafay makhsin kale oo uu ku jiray nin maskaxda ay wax uga dhinnaayeen oo la odhan jiray Dhucda. Mee Dhucdii iyo waa kan dharka cad gasho dhaha iyo waabu gashanyahay haddii ay isdhaafsadeen Daahir Xasan iyo Maxaabiistii Dhucda makhsinka kula xidhnaydna wuxuu Daahir Xasan bilaabay furista makhsinadii sadexda ninku kala jireen.

Abdirisaq sheekh Ibraahim Kooshin
Abdirisaqa lpho.
Bristol.
U.K.
abdirisakalpho@yahoo.co.uk


Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.